

# ILAAALINTA IJAARTAHA

LAGA BILAABO LUULYO 1, 2021 (SB 282 & SB 278)



## Sharciga joojinta iska saarida guriga ee Oregon ayaa joogsaday Juun 30-keedii, 2021.

Waxaa jira wakhti dheeraadka ah oo la isa siiyay ‘grace period’ oo loogu talagalay ijaarka wakhtigii la bixin lahaa la soo dhaafay ‘back-due rent’, laakiin laga bilaabo Luulyo, ijaartayaashu waa in ijaarka ku bixiyaan waqtigii loogu talagalay ama wajahaan iska saarida guryaha oo la xiriirta bixin la’aanta lacagta ijaarka. **waxaa jirta caawimaad la helayo.**

### maalgelin cusub oo muhiim ah oo loogu talagalay taageerada dhanka ijaarka ayaa la helayaa:

Haddii aad ka walwalsan in aadan bixin karin ijaarkii hore ee lagugu lahaa ama ka mustaqbalka, booqo [oregonrentalassistance.org](http://oregonrentalassistance.org) iyo [211info.org](http://211info.org) oo caawimaad u codso SIDA UGU DHAKHSAHA BADAN. Barnaamijyadani waxay dib u bixin karaan lacagtii ijaarka ee hore, ijaarka hadda, ijaarka mustaqbalka, adeegyada ‘utilities’, iyo kharashyada kale uu guriga.

### sharciga qofka ilaalinaya “safe harbor” haddii aad codsaday taageerada dhanka ijaarka:

Haddii aad ku nooshahay Degaanka Multnomah, waxaa jira 90 maalmood ah oo ah sharciga qofka ilaalinaya “safe harbor” in guriga laga saaro. Haddii aad ku nooshahay degaano kale, waxaad haysan doontaa 60 maalmood.

Si aad u hesho ilaalintani, waa in aad:

1. Codsata taageerada dhanka ijaarka—booqo [oregonrentalassistance.org](http://oregonrentalassistance.org) ama [211info.org](http://211info.org) si aad ogaato haddii aad u qalanto iyo sida loo codsado.
2. Haddii aad hesho ogeysiinta iska joojinta ijaarka ee bixin la’aanta lacagta ijaarka, [mulkiilaha gurigaaga caddeynta codsigaaga](#) ee loogu talagalay taageerada dhanka ijaarka ku sii muddo 10 maalmood gudahood ah si ay joojiyaan gudbinta kiiska iska saarida guriga.
3. Haddii mulkiilaha gurigaagu gudbiyo kiiska iska saarida guriga ka hor inta aadan bixin caddeynta codsigaaga, [weli waad joojin/hakin kartaa kiiskaaga iska saarida guriga](#) haddii aad caddeynta bixiso marka la joogo ama ka hor taariikhda ka soo muuqashada/imaanshaha u horreeya ee maxkamadda.
4. Tusida aad mulkiilaha gurigaaga tusayso caddeynta codsigaagu waxay [bixin doontaa sharciga qofka ilaalinaya “safe harbor”](#) in guriga laga saaro, si loo oggolaado in codsigaaga hawshiisa la qabto.
5. [Lacag bixinta waa in lagu sameeyaa muddada sharciga qofka ilaalinaya “safe harbor”](#) gudihiisa. Haddii ay tahay maya, iska saarida gurigu way sii socon kartaa.

### ogeysiinta bixin la’aanta lacagta ijaarka oo 10 maalmood ah waa in lagu daraa macluumaadka ilaalinta ijaartaha:

Ilaa Febraayo 28, 2022, ogeysiinta bixin la’aanta lacagta ijaarka waa in la isa siiyaa 10 maalmood oo lagu soo jawaabo ka hor inta aan iska saarida guriga la gudbinin. Ogeysiintu waa in ay bixisaa macluumaad ku saabsan wakhti dheeraadka ah oo la isa siiyay ‘grace period’ ee tooska ah ee loogu talagalay ijaarka wakhtigii la bixin lahaa la soo dhaafay ‘back-due rent’, iyo sharciga qofka ilaalinaya “safe harbor” in guriga laga saaro oo loogu talagalay ijaarka hadda.

### wakhti dheeraadka ah oo la isa siiyay ‘grace period’ waxaa loogu talagalay ijaarka wakhtigii la bixin lahaa la soo dhaafay ‘back-due rent’:

Ijaartayaasha haysta wakhti dheeraadka ah oo la isa siiyay ‘grace period’ ilaa Febraayo 28-keeda, 2022 si ay u bixiyaan ijaarka wakhtigii la bixin lahaa la soo dhaafay ‘back-due rent’ ee ka socda Abriil, 2020–Juun, 2021. Ijaartayaasha lagama saari karo guriga ama laguma dacweyn karo bixin la’aanta lacagta ijaarka ee looguu talagalay ijaarkan wakhtigii la bixin lahaa la soo dhaafay ‘back-due rent’ ilaa laga gaarayo Maarso 1, 2022. Is ilaalintani waa mid toos ah, wax caddeyn ahna la iskagama baahna.

### **heerarka u dhigan deganaanshaha ee la dabciyay:**

Ilaa Febraayo 28, 2022, qoysaska iyo dadka kale waxay si ku meel gaar ah u wadaagi karaan guryaha iyaga oo aan ka cabsanayn in guriga looga saaro ku xadgudubka siyaasada martida, ilaa iyo inta ay u hoggaansan yihiin sharciyada kale. Mulkiilayaasha guryaha waxaa dhici karta in ay sameeyaan baaritaannada taariikh dembiyeedka, laakiin ma aha baaritaannada dhanka deynta 'credit'.

### **ilaalinta deynta 'credit':**

Marka laga reebo bixinta lacag weli la isku leeyahay ka dib Febraayo 28-keeda, 2022, bixin la'aanta ijaarta gadaal la iskaga leeyahay ee ka socota Abriil, 2020-Juun, 2021 looma sheegi karo hay'adaha deynta ama lacag ururinta, ama looma adeegsan karo in lagaga horyimaado dadka marka ay codsadaan ijaar mustaqbalka.

### **ilaalinta diiwaanka iska saarida guriga:**

Mulkiilayaasha guryaha ma isticmaali karaan *mid kasta oo ka mid ah* diiwaannada iska saarida guriga oo ka socda Abriil, 2020-Febraayo, 2022 kaasi oo ka dhan ah marka ay codsadaan in ay wax ijaartaan mustaqbalka. Ijaartayaashu waxay yeelan karaan in diiwaannadani iska saarida guriga laga tirtiro diiwaannadooda.

---

**Waxaad xaq u leedahay ilaalintaasi si kasta ha ahaatee:  
Xaaladaada muwaadinimo OR cadadka ijaarka lagugu leeyahay**

---

**ee loogu talagalay talo dhanka sharciga ah ama macluumaad dheeraad ah: [oregonlawhelp.org](http://oregonlawhelp.org)**